# Gudniinka gabdhaha (goynta dhaqameed) iyo sharciga Australia

## Gudniinka gabdhaha, ama 'goynta dhaqameed ee dumarka' sharciga Australia ayay kasoo horjeedaa.

### Waa maxay gudniinka gabdhaha?

Gudniinka gabdhaha, sidoo kale loo yaqaan Goynta xubinta taranka ee haweenka (Female Genital Cutting - FGC), waa caado dhaqameed. Waxay ku lug leedahay jarista aagga dibeda ee xubinta taranka (siilka), faruuryaha iyo kintirka. Ma jiraan faa'iidooyin caafimaad, waxayna dhab ahaantii wax u dhimi kartaa caafimaadka galmada iyo taranka qofka.

### Muxuu sharcigu ka yidhi dhaqankan?

Waa sharci darro in qof lagu sameeyo gudniinka gabdhaha.

Tallaabooyinka soo socdaa waa sharci-darro in uu dhakhtarku sameeyo sababo caafimaad dartood mooyee:

- goynta ama in la jaro qayb ka mid ah xubinta taranka haweenka (goynta), oo ay ku jiraan kintirka iyo faruuryaha
- In laisku tolo xubinta taranka (infibulation)
- qaliin kasta oo lagu yareynayo ama lagu xirayo daloolka xubinta taranka
- jarista kintirka ama qayb ka mid ah kintirka (clitoridectomy)
- in la dhaawaco ama la naafeeyo xubinta taranka.

Sidoo kale waa sharci daro Victoria gudaheeda in:

- in qof loo kaxeeyo meel ka tirsan Australia ama waddan kale si loogu soo sameeyo gudniinka dumarka
- aad gacan ku siiso qof kale gudniinka gabdhaha
- Aad raadiso qof gudniinka gabdhaha sameeya.

**Xitaa haddii uu qofku ogolaado qaliinka, ama waalidkii ay bixiyaan fasax, taasi wali waa sharci-darro.**

### Maxaa dhacaya haddii uu qof jebiyo sharciga?

Qofku wuxuu jebiyay sharciga haddii:

- uu sameeyo qaliinka
- uu gacan ku siiyo qof kale inuu sameeyo qaliinka
- Uu raadiyo qof qaliinka sameeya.

Victoria gudaheeda, ciqaabtu waxay noqon kartaa xabsi ilaa 15 sano ah.

### Ma jiraan wax habraacyo qalliin ah oo la oggol yahay?

Hababka qaliinka ee xubinta taranka haweenka waa la ogol yahay xaaladaha qaarkood. Dhakhtarka ama umulisada ayaa samayn kara qalliinka nuucan ah marka:

- qaliinka loo baahan yahay sababo caafimaad awgeed
- ay lagama maarmaan tahay xilliga foosha ama isla markiiba dhalamada ka dib.

Dhakhtarka caafimaadku waxa kale oo uu qaliin ku sameyn xubinta taranka haweenka haddii uu yahay qalliin lagu xaqiijinayo jinsiga.

### Qof dib ma loo tolli karaa (re-infibulated) dhalmada ka dib ama qaliin kale oo dumarka?

Maya, dib-u-tolista (re-infibulated) si loo yareeyo ama loo xiro daloolka xubinta taranka sababo aan caafimaad ahayn lama ogola.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in loo baahdo tolmo dhalmada ka dib haddii ay jirto meel jeexantay ama qalliin lagu gooyay. Taas waxaa sameeya dhakhtar ama umuliso wax yar ka dib dhalmada.

## Yaa usoo sheega dowlada gudniinka dhaqameed ee ilmaha lagu sameeyo?

Victoria gudaheeda, gudniinka habluhu waa sharci-darro waxaana loo arkaa xad-gudub loo geysanayo ilmaha haddii lagu sameeyo ilmo ka yar 18 jir.

Taas macnaheedu waa dadka la shaqeeya carruurta, sida dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka, umulisooyinka, macallimiinta, shaqaalaha daryeelka carruurta, iyo booliiska, waa inay ogeysiiyaan Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha haddii ay ka shakiyaan in ilmo la guday.

Si kastaba ha ahaatee, qof kasta ayaa warbixin u diri kara Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha.

## Wixii macluumaad dheeraad ah

Shaqaalaha Barnaamijka Waxbarashada Xuquuqda Dhalmada iyo Qoyska (The Family and Reproductive Rights Education Program - FARREP) ee Haweenka waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha, 9-ka subaxnimo ilaa 5-ta galabnimo.

T: (03) 8345 3058
E: farrep.program@thewomens.org.au
F: (03) 8345 3053

Ama la xidhiidh shaqaalaha FARREP ee xarunta caafimaadka bulshada deegaankaaga.

Ka raadi mareegahayaga wixii macluumaad dheeraad ah:
http://www.thewomens.org.au/health-information

## Isku xirka luqadda

በርስዎ ቋንቋ መረጃ ለማግኘት በድረገጻችን ላይ ይጎብኙ
للحصول على المعلومات بلغتكم زوروا موقعنا الإلكتروني
用您說的語言瞭解詳情，請瀏覽我們的網站
Για πληροφορίες στη γλώσσα σας επισκεφθείτε την ιστοσελίδα μας
अपनी भाषा में जानकारी प्राप्त करने के लिए हमारी वेबसाइट पर जाइए
Per informazioni nella vostra lingua visitate il nostro sito web
Macluumaad intaas ka badan oo af Somali ah booqo websaytkayaga
Kendi dilinizde bilgi almak için web sitemizi ziyaret edin
Để biết thông tin bằng ngôn ngữ của quý vị, hãy truy cập trang mạng của chúng tôi

## Ma u baahan tahay turjubaan?

Waxaad codsan kartaa turjubaan haddii aad u baahan tahay.

## Taageerada Rabshadaha Qoyska

**1800 Xushmad Khadka Caawinta Qaranka**

Waxaad heli kartaa caawimo haddii aad la kulantay xadgudub galmo, rabshad guri ama qoys iyo xadgudub. Waxaad wici kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.
1800 737 732 (adeegga taageerada oo 24-saac ah)
1800respect.org.au

## Tixraaca sharciga

### Sharciyada Victoria

- Sharciga Dambiyada 1958 (Vic) s32 - 34A
- Xeerka Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska 2005 (Vic) s162, s163, s182, s184

### Sharciyada Gobol;ada iyo Territoriyada kale ee Australia

- Sharciga Dambiyada 1900 (ACT) s73-s77
- Sharciga Dambiyada 1900 (NSW) s. 45, s45A
- Xeerka Ciqaabta (NT) Qaybta 4A
- Xeerka Ciqaabta ee 1899 (Qld) 323A, 323B
- Sharciga Isku-dhafka Sharciga Dambiyada 1935 (SA) Qaybta 8
- Xeerka Ciqaabta ee 1924 (Tas) s178A
- Xeerka Isku-dubbaridka Xeerka Ciqaabta ee 1913 (WA) s306

**Cudurdaar:** Xaashidan xaqiiqadu waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo keliya. Wixii talo gaar ah ee ku saabsan baahiyahaaga daryeelka caafimaadka, waa inaad talo ka raadisaa xirfadlahaaga caafimaadka. Royal Women's Hospital ma aqbalayo wixii masuuliyad ah ee ka yimaada khasaaraha ama dhaawaca ka dhasha ku tiirsanaantaada xaashidan halkaad arki lahayd xirfadle caafimaad. Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, fadlan la xidhiidh waaxda degdegga ah ee kuugu dhow. © The Royal Women's Hospital 2025